

Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa

Nabadeey Fircoonow!



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson


Waxa dhaqan-geliyay: Lyn Doerksen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Fircoon wuu ka cadhooday!
Wixii Ilaah ku amray isaga
oo uu u sheegay Muuse inay
addoomaha Reer Binu
Israa'iil ka tagaan
Masar. Wuu diiday.



"Hawlo culculus," in loo dhiibo ayuu Fircoon ku amray kuwii Addoomada xukumay. Iminka wayba uga sii dartay Israa'iiliyiintii.

3

"Isku soo ururiya xashkiinii cawska engagna ahaa, idinma ma siin doono hadda ka dib. Laakiin sameeya tire jaajuur ah in la eg intaad sameyn jirteen." Sidaas buu Fircoon ku bixiyey amararadiisii cusubaa.




4

Nimankii ku shaqada karbaashka lahaa isla kolkaa waxay garaacyeen addoonta sababtoo ah wakhti dheeraad ah uma aysan haysan inay soo guraan



xashka cawska engagan iyo samaynta jaajuurada.



5

Dadkii waxay eedeyn dul saareen Muuse iyo Haaruun inaan looga horreyn dhibaatan ku dhacaysa. "Adigu dadkaada ma samata bixneysid sideedaba." "Anigu waxaan ahay




Rabbigiina, oo waan idinka soo saari doonaa," ayuu Ilaah ku yidhi.

6


Dabadeedna Ilaah wuxuu u diray Muuse iyo Haaruun inay dib ugu laabtaan Fircoon. Markii boqorkii arlada u talin jiray weyddiistay adeegayaashii

calamad ka timid Ilaah, Haaruun ushii geedka ka samaysnayd baa mas dhuuban isu bedeshay.



7

"Tigu yeedha saaxiriintii," ayuu Fircoon ku qayliyey. Markii saaxiriintii Masaarida dhulka ku tureen ulahoodii, mid walba waxay noqotay mas iyana. Laakiin ushii Haaruun baa liqday kuwii kale. Wali, Fircoon wuu diiday inay dadkii iska baxaan.




8

Sabaxii dambe, Muuse iyo iyo Haaruun baa ku kulmay wabiga. Markii uu Haaruun ushiisii ku fidiyey, Ilaah biyihii wuxuu u bedelay dhiig. Kalluunkii wuu wada dhintay! Dadkiina ma aysan cabdi karin!



9


Laakiinse Fircoon qalbigiisii wuu sii adkaaday. Mana uusan yeelin inay Israa'iliyiintii ka baxaan dalka Masar.



10

Mar kale ayuu Muuse la hadlay Fircoon inuu dadaka sii daayo.


Fircoonse wuu ka diiday haddana. Ilaah wuxuu u soo diray balaayo kale. dalka Masar oo idil waxaa buux dhaafiyey Rah. Guri walba, qol walba iyo jiko walba waxaa ku dul orday Rahyo fara badan.



11

"II duceey aniga, waa intaasoo

Ilaah iga saaraa Rahan," ayuu ku baryootamay Fircoon, "Oo dadkaaga waan kuu siideyn doonaaye." Laakiin, markii rahyadii tageen, Fircoon wuu beddelay go'aankiisii. Ma uusan xorayn addoommadii.




12

Ilaah kolkaa balayiin Injiro u soo diray, kolkaaseey iswada xoqxoqeen qaniinyadeeda darteed, laakiinse Fircoon ma siinin dadkii Ilaah.




13

Waxaa xigtay inuu Ilaah u diray duqsiyo, raxan raxan u socda iyagii. Ilaah wuxuu u soo diray cudurro dila xoolaha nool Masaaridii.



14



Ilaah wuxuu u soo diray boogo nabara xunxun ah. dadkii way dhibaatoodeen oo cabsi baa gashay. Wali Fircoon wuu iska caabinayaa Ilaah.

15




Balaayooyinkii nabarada ka dib, Ilaah wuxuu u soo diray ayax guuraya. Ayaxii wuxuu cunay dhirtii cagaarnayd oo idil ee dalka ku yiil.

16



Dabadeed Ilaah wuxuu u soo diray in saddex maalmood (caana maal) oo mugdi ah. Laakiin madax adaygii Fircoon uma aysan suur galayn inay xoroobaan Israa'iliyiintii.

17



"Waxaan idiin soo diri doonaa malayo dheeraad ah kolkolkan." Ayuu Ilaah ugu digay. "Habeenbadka baan Masar ku dhex socon doonaa, oo curadyada jooga dalka Masar iyo xoolaha oo idil way wada dhiman doonaan." Wuxuuna Ilaah ku yidhi reer Binu Israa'iil curadyadooda waa la badbaadin doonaa haddii orgiyo la qalay dhiigiisa ay mariyaan faaradda albaabda guryahooda.

18




Saqdii dhexe ee habeeni-madaa, aya oohin badan ka dhex yeedhay guryihii Masaarida oo geeri farabadan baa dhacday. Ugu yaraan hal qof baa ka dhintay goys walba.

19



"Iska baxa," Ayuu Fircoon ku baryay Muuse. "Taga oo u adeega Rabbiga." Durbadiiba, dadkii Ilaah waxay bilaabeen guuritaan inta ku aadan xaggaa iyo xuduudda Masar inta ka shisheyso.

20



Ilaah wuxuu u sheegay Muuse inuu xasuusto habeenkii kor maridda sababatoo ah Mla'iktii Ilaah baa soo dul martay reer Binu Israa'iil guryahoodii iyo kuwii Masaarida ee la laayay iyo dadkiisaba.

21



430 sanadood ka dib oo ay joogeen Masar, Ilaah dadkiisa iminka waa xoroobeen. Ilaah wuxuu ku hagayay tiir daruur ah iyo tiir dab ah habeenkii.


22



Laakiin Fircoon weli kama dhamaan reer Binu Israa'iil Kol kale ayuu ilaabay Ilaah.


Kol kalena, wuu bedelay maskaxdiisii. Wuxuu isu keenay ciidamadiisii, wuxuuna ka daba tagay addoontii. Markiiba wuxuu ku dageen halka u dhaxeysa qararka waddadad wareegra iyo badda agteeda.

23



"Ilaah baa idiin dagaalamaya," Muuse ayaa sidaa yidh. Muuse wuxuu sii hor tagay xeebta badda afkeeda gacmihiisuuna kor u qaaday.

24



Mucjiso weyn baan dhacday Ilaah biyihii buu waddo ka baneeyey. Dadkiina si bad-qab ah bay kaga gudbeen.

25



Dabadeedna Fircoon iyo ciidankiisii ku tuuray Badda Cas. "Iminka waynu soo qabanaynaa" sidaa bay ku fikirayeen ciidankii. Laakiin Ilaah wuu xidhay biyihii. Ciidankii xooga lahaa ee Masaarida way liqeen biyihii.

26

Nabadeey Fircoonow!


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Baxniintii 4-15

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiya." Sabuurka 119:130

27



11



60

28

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doona! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

29